

Macluumaad kugu socda adiga ka waalid ahaan

2023-05-03

Macluumaad ku saabsan xarumaha xilliga firaaqada 6-12 sano jir

Waa lugu salaamay!

Macluumaadkan wuxuu ku socdaa adigaaga leh carruur dhigata fasalka 3-aad iyo adigaaga leh carruur dhigata fasalka 4-6. Wuxuu macluumaadku ku saabsanyahay isbeddello soo socda oo khuseeya xarumaha xilliga firaaqada.

Xafiiska waxbarashada ayaa guddiga waxbarashadu u wakiisheen inuu si isu dhiganta u nidaamiyo xarumaha xilliga firaaqada ee ardayda 6-12 jirrada ah, laga billaabo sannad dugsiyeedka 2023/2024. Xarumo xilli firaaqo oo isu dhigma oo luugu tala galay 6-12 jirradu waxay ka dhigantahay in xitaa ardayda 10-12 jirrada ah ay heli doonaan fursad dheeri ah oo ay boos uga helaan xarumo xilli firaaqo haddii ay jirto baahi taas loo qabo.

Haddi aad canuggaaga dhigta fasalka 3 boos uga haysato xarun xilli firaaqo

31da Luulyo ee sanadka uu ardaygu dhameynayo fasalka 3, si ootomaatig ah ayaa looga joojinayaa booska xarunta xilliga firaaqada. Haddii aadan boos ka rabin xarunta xilliga firaaqada ee 10-12 jirrada, ma u baahnid inaad wax sameyso.

Haddii aad adigu ka waalid ahaan rabto inaad booska iska joojiso inta aan la gaarin 31 Luulyo waxaad taas ku samayn kartaa adeegga elekteroonigga ah ee dugsiyada xannaanada iyo xarumaha xilliga firaaqada. Adeegga elekteroonigga ahi wuxuu ku jirya barta intarneetka degmada norrköping.se.

Haddii aad canuggaaga 10-12 jirka ah boos uga rabtid xarunta xilliga firaaqada

Haddii canuggaaga jira 10-12 sano uu boos uga baahanyahay xarun xilli firaaqo, waxaad taas ku codsan kartaa

adeegga elekteroonigga ah ee dugsiyada xannaanada iyo xarumaha xilliga firaaqada. Haddii aad horay booskaaga u celisay, aadna boos cusub raadsaneyso muddo saddex bilood gudahood ah, waxaad u baahanaysaa inaad bixiso kharashaadki muddadi u dhexeysay waqtiyadaas oo dhan.

Sidan ayuu nidaamka xarumaha xilliga firaaqadu u ekaan doonyaa

Nidaamka xarumaha xilliga firaaqada ee ardayda 10-12 jirrada ah si tartiib tartiib ah ayaa loo kordhin doonaa, siyaabo kala duduwan ayuuna billawga hore ugu muuqan doonyaa dugsiyada kala duduwan. Guud ahaan, siyaabaha soo socda ayey wax noqonayaan:

- Dugsiyada leh fasallada dugsiya xannaanada ilaa fasalka 6 ee maanta leh xarumo xilli firaaqo waa ay kordhinayaan hawlahooda.
- Dugsiyada leh fasallada dugsiya xannaanada ilaa fasalka 6 ee maanta u furan hawlaha 10-12 jirradu siima wadi karayaa taas, ee waxay bixin doonaan oo keliya adeegga xarumaha xilliga firaaqada.
- Dugsiyada aan maanta lahayn xarumo xilli firaaqo waxay billawga hore boos xilli firaaqo dadka ka siin doonaan dugsi ku agyaal.

Hawlaha furan ee 10-12 jirrada waxaa maanta laga bixiyaa jardiinooyinka xilliga firaaqada oo qayb ka ah hawlaha xafiiska waxbarashada. 1 Agoosto ee 2023 waxaa hawlaha jardiinooyinka xilliga firaaqada ee dhalinyarada, halkaas oo ay ka mid yihiin hawlo furan ee 10-12 sano jirrada iyo hawlaha dhallinyarada, loo wareejin doonaa xafiiska dhaqanka iyo xilliyada firaaqada. Sida dhab ahaan loo nidaamin doono hawlaha furan ee 10-12 jirrada waxaa soo sheegi doona xafiiska dhaqanka iyo xilliyada firaaqada.

Hawlaha qoran ee 10-12 jirradu waxay u dhigmi doonaan xarumaha xilliga firaaqada, waxaana lagu bixin doonaa dugsiyada hoose-dhexe.

Macluumaad dheeraad ah

Bogga norrkoping.se ayey ku jirtaa xog dheeraad ah iyo su'aalo iyo jawaabo ku saabsan xarumaha xilliga firaaqada. Fadlan booqo bogga haddii aad rabto inaad wax badan ka ogaato ama aad qabto su'aalo ku saabsan xarumaha xilliga firaaqada.

www.norrkoping.se/fritidshem

Adeegga elekteroonigga ah ee dugsiyada barbaarinta iyo xarumaha xilliga firaaqada

Haddii aad u baahantahay in lagaa caawiyo boos ka codsashada xarunta xilliga firaaqada ama boos iska celin, waxaa laguugu soo dhaweynayaa inaad wacdo Xarunta Xiriirka, nambarka 011-15 00 00. Waxaad sidoo kale iyaga ku booqan kartaa Trädgårdsgatan 21.

Salaan saaxibtinimo

Xafiiska arrimaha waxbarashada

